

# TALLAALKA BUSBUSKU WUXUU KAA BADBAADIYAA CUDURRO HALIS AH

Tallaalka busbuska waxaa laga billaabo 1.9.2017 loo fidinayaa dhammaan carruurta da'doodu u dhexeyso 1,5-11 sano ee uusan weli ku dhicin busbusku. Tallaalku wuxuu ku jiraa barnaamijka tallaalka qaranka waana lacag la'aan. Tallaalka waxaa inta lagu jiro xilliga koontaroolka da'da lagu siinayaa carruurta rugta la-talinta iyo dugsiga. Tallaalka waxaa la qaadanayaa labo jeer.

## Busbuska iyo Shingles

Busbusku waa xaalad caabuuq oo jirka oo dhan ah ( caabuuq guud). Calaamadahiisa guud waa nabar-biyoodyo iyo xummad qaadata 5-7 maalmood. Inta badan cudur daran ayuu busbusku dadka waa weyn ku noqdaa.

Si aad u fudud ayaa lagula kala qaadaa busbuska. Qofka cudurka qaaday wuxuu ku qabadsiiyaa dadka muddo labo maalmood ah kahor inta aysan ka soo bixin calaamadaha cudurku, ku qabadsiiintuna waxey sii soconaysaa 4-5 maalmood laga soo billaabo marka ay calaamaduhu soo baxaan. Jirrada kaddib fayruska busbusku wuxuu degaaa unugyada jirka wuxuuna marka dambe keenaa in saddexdii qofba hal qof uu ku dhaco Shingles, kaas oo ah cudur keena nabar-biyoodyo xanuun badan.

## Cudurada ka dhasha busbusku waa kuwa dhif ah, balse halis ah

Cudurka ugu badan ee ka dhasha busbuska kuna dhaca carruurta waa caabuuq bateeriyeed daran oo jirka ku dhaca. Cudur dambeed ahaan waxaa looga qaadi karaa cudurka sanbabka ama maskax barar ay la socoto halista waxyeelo joogto ah.

Halis weyn ayeey dadka qaangaarka ah ugu jiraan cudur-dambeedka. Dhaxalka ugu daran ee busbuska laga dhaxlo wuxuu ku wajahan yahay hooyada uurka leh iyo ilmaha uurka ku jira. Haweeneyda uurka leh waxey jirradu u keeni kartaa cudurka sanbabka ee halista ah, cunugga uurka ku jirana qaab-darro daran oo dhinaca dhismaha jirka ah iyo naafo dhinaca caqliga ah (waxaa loo yaqaanaa ififaalooyinka busbuska).



TERVEYDEN JA  
HYVINVOINNIN LAITOS

## Tallaalku wuxuu kaa badbaadinayaa busbuska iyo cudurada ka dambeeya ee ka dhasha

Tallaalka busbuska oo labo jeer la qaataa waxaa laga helayaa badbaadin aad u fiican. Wadamada helitaanka tallaalka busbusku uu yahay mid aad u sareeya carruurta ku nool uma dhintaan busbus isbitaalna uma galaan. Xittaa busbuska aan darneyn ayaa yar wadamadan.

Tallaalka busbuska waxaa la isticmaalayay muddo 20 sano ah, waxaana adduunka oo dhan laga bixiyay in ka badan 200 oo malyan oo tallaalka. Waxyaabaha ka dhasha tallaalka si fiican ayaa loola socday mana lagu arkin wax dhibaato ah oo macno leh. Qiyaastii shantii qof ee la tallaalaba hal qof ayaa waxaa lagu arkay calamaado meelaha la tallaalku ku gaar ah sida xannuun laga dareemo meesha cirbadda lagu muday, casaan ama barar. Qiyaastii sideedii qof ee la tallaalayna hal qof ayaa xummad lagu arkay. Wax ka yar labaatankeii qofba hal qof ayaa lagu arkaa dhowr nabar-biyood oo tallaalka ka dhasha.

Tallaalkan muddo dheer ayaa laga isticmaalayay Finland, laakiin marki lagu daray barnaamijka tallaalka qaranka kaddib ayuu noqday mid lagu helayo lacag la'aan.




## Busbuska

Nabar-biyoodiyada carruurta ka sooo baxa waa 250-500. Marka uu cunuggu xoqo ayey bakteeriyada sababta qolof-malaxeedku dhexgashaa nabar-biyoodiyada.

Cudurka ugu badan ee ka dhasha busbuska kuna dhaca dadka waaweyn waa cudurka sanbabka. Hooyada uurka leh wuxuu ku noqon karaa mid halis ah.

Busbuska lagu dhasho wuxuu yimaadaa inta uurka lagu jiro. Wuxuuna inta badan cunugga aan dhalan u keenaa waxyeelooyin halis ah.



Mararka qaar lablabo ayaa laga qaadi karaa busbuska. Socodku waa mid aan toosneyn in muddo ah hadalkuna fasiix ma ahan.

Busbuska u dhow xilliga dhalashadu wuxuu cunuggu dhallaanka ah u keeni karaa busbus, kaas oo inta badan u baahan in isbitaalna la dhigo.

U nuglaansho dhiig-bax laga reysto ayaa ah cudur ka dhasha busbuska. Maadada xinjireynta dhiigga ayaan markaas ku filneyn in uu dhiiggu xinjiroobo.

## Tallaalku wuxuu ka-hortagaa busbus halis ah.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan busbuska, halisyayda la xiriira cudurka iyo tallaalkaba waxaad ka heleysaa rugta talo-bixinta, kalkaalisada caafimaadka dugsiga ama internetka

[www.thl.fi/vesirokkorokote](http://www.thl.fi/vesirokkorokote)



TERVEYDEN JA  
HYVINVOINNIN LAITOS